

Sida dhakhtarka mustaqbalka Ali uu u hago soo galaytiga cusub isagoo maraya nidaamka daryeelka caafimaadka ee Dutch-ka

Shakhsiyaadka muhiimka ah waa cida diirada lagu saarayo mashruuca SAMEN. Hadafka mashruucan IOM iyo Doctors of the World waa in la bilaabo dood ku saabsan galmada iyo rabshadaha jinsiga la xidhiidha ee bulshooyinka muhaajiriinta oo ku nool Netherlands lana horumariyo helitaanka daryeelka caafimaadka. Shakhsiyaadka muhiimka ah, xirfadlayaasha u qalma ee leh taariikh muhaajirnimo sida 29-jirka Ali, ayaa isku xidhaya soo galaytiga cusub iyo nidaamka daryeelka caafimaadka ee Dutch-ka. Qormadani, Ali wuxuu ku sharxayaa khibradhiisa.

Sheekada Ali

Ali wuxuu ku dhashay Suuriya asalkiisuna waa reer Falastiin. Wuxuu ku noolaa Netherland ilaa da'da 20. Sagaal sano kadib, wuxuu ka helay shahaadadiisa koobaad ee jaamacada oo caafimaadka ah Vrije Universiteit oo kutaal Amsterdam wuxuuna hadda wadaa shahaadadiisa labaad ee jaamacada. Diseembar wuxuu bilaabi doonaa tababarkiisa waxbarasho.

Marka laga yimaad waxbarashadiisa, Ali wuxuu sidoo kale ka yahay kaaliye dhakhtar waaxda bukaan socodka qeybta wadnaha ee cisbitaalka Amsterdam. Hooyadii, Sanaa, ayaa mar horeba ahayd shakhsi muhiim ka ah mashruuca SAMEN. Shakhsiyaadkan muhiimka ah, oo sidoo kale ah dhexdhexaadiyayaal dhaqan, ayaa loo tababaraa inay kusoo daraan dood galmada iyo jinsiga kooxaha muhaajiriinta ah, iyo sidoo kale leh taariikh (lamida) oo muhaajirnimo. Haddaba iyagu, waxay cidkastaba kaga fiican yihiin, caqabadaha soo galaytiga Netherlands waajahayaan.



Sanaa ayaa wax uga sheegtay Ali shaqadeeda shakhsi muhiim ahaan. "Waxay tiri waxbay ii tahay aniga, waayo waan bartaa caafimaadka," Ali ayaa yidhi. "Soo galaytiga badanka waxa ku adag inay fahmaan nidaamka daryeelka caafimaadka Dutch-ka. Sidaasi darteed waxay u muuqatay fikrad fiican in la caawiyo marka laga eego aragtida caafimaadka."

Caqabadaha ay waajahaan soo galaytiga cusub

Markii Ali uu yimid Netherlands, wuxuu xaqiiqsaday sida waxyaabaha kala duwan la isku barbardhigayo Siiriya. "Guud ahaan, nidaamka caafimaadka wuu fiican yahay, laakiin waxyaabaha sida gudbinta ayaa

adag," ayuu sharxayaa. "Wadamo badan, dadku waxay toos u helaan dhakhaatiirta iyo daaweynta sida anibaayootigiska oo laga helayo farmasi bilaa qoraal. Tani maaha macquula dalka Netherlands."

Khibradihiisa dartood, Ali wuxuu u fahamsan yahay macaamiishiisa si fiican. Shakhsi muhiim ah ahaan, Ali wuxuu dhageystaa sheekooyinka soo galaytiga cusub ee la halgamaya khibradaha uur-ku-taalooyinka wuxuuna ka caawiyaa helitaanka caawimada kuhaboon.

Mid kamida ugu shucuurta badan waxay ahayd caawinta gabadh yar oo uu dhibaateeyey wiil jooga xarunta qaxoontiga oo ay la joogtay. "Waxaan caawiyey xilligii la kulankeeda dhakhtarka cilmi-nafsi. Sababtoo ah waxaan kula hadlay luuqadeeda, way i aamintay oo waxay rabtay inay ila wadaagto sheekadeeda waxaan hubiyey in loogu turjumo si saxa dhakhtarka cilmi-nafsi. Gabogebadii, xaalada waa la xaliyey oo gabadhu imika waxay ku nooshahay meel kale, meel ay ku dareemayso badqab."

Shakhsiyadka muhiimka ah

Shakhsiyadka muhiimka ah waa lama huraan marka loo eego Ali sababtoo ah waxay sameeyaan biriish u dhaxeeya dhaqamada kala duwan. "Waxay fududeeyaan in la sharxo sida nidaamku u shaqeeyo waxaanay ka siiyaan talo waxa qof qabanayo. Oo wadajir, waxaynu ugu qaban karnaa arintaasi luuqado kala duwan: Faarsi, Turkish, Afgaan, Urduu, iyo qaar kaloo badan." "Waxa daruuri ah in codsiga qof ee caawimo la fahmo", Ali ayaa kusii daray. "Wada-xidhiidh wanaagsan ayaa ugu muhiimsan nidaamka bixinta caawimada ."

Doorarka shakhsiyadka muhiimka ah ee daryeelka caafimaadku waa daruuri. Waxay hubiyaan in soo galaytiga cusub u heli karaan xal mushkiladaha nidaamka oo ay heli karaan caawimada ay u baahan yihiin. Shaqada Ali waa tusaale fiican oo sida argatida caafimaadka iyo xasaasiyada dhaqanku isku waafaqi karaan ('SAMEN gaan') si loo siiyo daryeel saxa.